

Tallaalka COVID-19 ee Pfizer ee La Siinayo Dadka Ka Yar Da'da 18 Sano

11/3/2021

Waqti xaadirkan, tallaalka COVID-19 ee Pfizer ayaa ah tallaalka kaliya ee COVID-19 ee la daraaseeyay loona oggolaaday in la siiyo dadka da'doodu tahay 5 sano iyo ka weyn. Xogta laga helay daraasaadka lagu sameeyay tallaalka Pfizer ayaa muujinaysa in tallaalku uu badqab yahay waxtarna u leeyahay dadka da'doodu tahay 5 sano jir. Soosaarayaasha kale ee tallaalka ayaa sidoo kale ku daraaseynaya tallaalkooda kooxaha da'da yar balse weli kama aysan helin oggolaansho U.S Food and Drug Administration, (FDA) (Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka ee Mareykanka).

Oggolaanshaha waalidka ama wakiilka ayaa loo baahan yahay si loo bixiyo tallaalka

Oggolaanshaha waalidka ama wakiilka ayaa loo baahan yahay si loo siiyo tallaalka COVID-19 carruurta da'doodu u dhaxeeyso 5-17 sano, marka laga reebo xaalado gaar ah. Tixraac Xeerarka Minnesota, qaybaha 144.341 illaa 144.347. Waxaan ku dhiirigelinaynaa waalidka ama wakiilka inuu ilmihiisa u raaco ballanta tallaalka si ay wax uga ogaadaan tallaalka COVID-19 oo ay u bixiyaan oggolaanshaha ilmaha inuu qaato tallaalka.

Haddii waalidka/waakiilka aysan awoodin inay raacaan ilmaha si ay u soo qaataan tallaalkooda, weydii adeeg bixiyaha hannaankooda oggolanshaha oo hel warqadda xaqiiq qorka ee Oggolaanshaha Isticmaalka Gurmada Degdegga ah (EUA): [Wargadda Xaqiiq Qorka EUA ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ee loogu talagalay Dadka Qaata Tallaalka iyo Daryeel Bixiyeyaasha ee 12 sano jirka ah iyo ka weyn \(www.fda.gov/media/153716/download\)](https://www.fda.gov/media/153716/download) ama [Wargadda Xaqiiq Qorka EUA ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ee loogu talagalay Dadka Qaata Tallaalka iyo Daryeel Bixiyeyaasha ee 5-11 sano jirka ah \(www.fda.gov/media/153717/download\)](https://www.fda.gov/media/153717/download). Tani waxay la mid tahay Bayaanada Macluumaadka Tallaalka ee la bixiyo kahor tallaalka kale ee caadiga ah. Xaqiiji in dhammaan su'aalahaaga laga jawaabay. Goobaha tallaalka bulshada ee gobolka uu kafaalo qaado, waalidka ama qofka wakiilka waa inuu ku weheliyo carruurta da'doodu tahay 15 iyo ka yar.

Ma raadineysaa ballamaha tallaalka COVID-19 ee Pfizer

Tallaalka COVID-19 bilaash ayuu u yahay qof kasta. Waxaad isticmaali kartaa khariidadda [Tallaalka COVID-19 ee Carruurta iyo Dhallinta \(mn.gov/vaxforkids\)](https://mn.gov/vaxforkids) si aad u raadiso adeeg bixiyeyaasha bixiya tallaalka COVID-19. Kahor intaadan tagin, hubi in goobta tallaalka ay bixiso tallaalka Pfizer ee u dhiganta da'da ilmahaaga. Tallaalka carruurta da'doodu u dhaxayso 5 jir ilaa 11 jir wuu ka qiyaas yar yahay tallaalka Pfizer ee dadka da'doodu tahay 12 iyo ka weyn. Ma ahan in dhammaan adeeg bixiyeyaasha tallaalka Pfizer ay lahaan doonaan tallaalo si gaar ah loogu baakadeeyey kuurayaasha 5- ilaa 11-jirka ah marka la qaybinayo.

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa ballamaha tallaalka COVID-19 barta [Vaccines.gov](https://vaccines.gov) iyo waaxyada caafimaadka fayodhowrka ee deegaanka ee [Minnesota: Raadi Rugta Tallaalka \(prepmod.health.state.mn.us/clinic/search\)](https://mn.gov/health/prepmod/health.state.mn.us/clinic/search). Labaduba waxay kuu oggolaanayaan inaad ku shaandheyso nooca tallaalka si aad u raadiso waxaad u baahan tahay.

TALLAALKA COVID-19 EE PFIZER EE LA SIINAYO DADKA KA YAR DA'DA 18 SANO



Minnesota Department of Health | health.mn.gov | 651-201-5000
625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

La xiriir health.communications@state.mn.us si aad uga codsatid nooc kale. (Somali)